



Forsvaret
Innsatsstyrke
Gunnerside, HV-03

Waxaanu samaynayaa tababarasho si aad u dareento amni



Ciidamada qalabka sida ayaa dhawaan tababar ku qaadan doona aagaga dhow. Waxaan rabnaa in qof walba si wanaagsan loogu wargeliyo.

Muddada 11.-15. Juun 2024, ciidanka (Insatstyrke Gunnerside) ayaa tababarasho ku samayn doona Grenland. Inta lagu jiro tababarshada, waxa aanu tababar la qaadan doonaa ciidamada madaniga ah ee Grenland, oo ay ku jiraan adeegyada gurmada deg-dega ah iyo maamulka degmada Skien.

Muuqaalka jimicsiga ayaa lagu daray qalalaasaha/isku dhaca, halkaas oo Norway ay dagaal kula jirto waddan kale. Maamulka gobolka ayaa weydiistay ciidamada qalabka sida ee Norway in laga caawiyo xallinta howlgallada amniga iyo waxa aan ugu yeerno mission-ka ilaalada. Sidaas awgeed waxa Grenland ka dhici

doona xoogaa dhaqdhaqaaq ciidan ah muddadaas, iyadoo si gaar ah diiradda loo saari doono dugsigii hore ee Skien, Herøya iyo Henrik Ibsens albaabka 7.

13-14. Juun waa maalmaha ugu muhiimsan ee tababarsashada.

Waxaan ku dhiirigelinaynaa dadka maalmahan ku sugan Skien inay la xiriiraan askarta aad aragto oo ay la sheekaystaan. Sidoo kale waxaa tababarkan qeyb ka ah in ciidamada ay la jaanqaadaan xaaladda caadiga ah ee deegaanka.

Waxaan si buuxda u fahamsanahay in dadka qaarkood ay u arki karaan wax aan fiicnayn in lagu arko askarta gudaha magaalada, laakiin si loo hubiyo xasiloonida iyo badbaadada haddii ay dhacdo xiisad/ dagaal, ciidanka madaniga ahi waa in ay u tababartaan sida ugu macquulsan ee suurtoogalka ah. Haddii aan dooneyno inaan ilaalino dadka iyo waxa qiimaha u leh bulshada hadii dhibaato dhacdo, waa inaan tababarnaa halka dadka iyo qiyamku ay yihiin maalin kasta. Hadda waxaa naloo oggolaaday inaan amaahanno tasiilaadka ku habboon nooca tababarkeenna.

Tababarka ayaa waxaa ka qeyb qaadan doona baabuurta ciidamada iyo ciidamada lugeynaya ee ku sugan aagaga. Iyadoo ku xiran xaaladda aan ku tababareyno, rasaas ayaa la isticmaali doonaa taasoo keeni karta dhawaaq rasaaseed.

Ciidanka (Gunnarside) waa qayb ka mid ah ciidanaka madaniga ah oo degdeg uga fal celiya hadii dagaal ama qalalaase dhaco, waxayna ka kooban yihiin rag iyo dumar deegaanka yaqaan oo shacabka xiriir la leh, aqoona waxay u leeyihiin ciidanka mileteriga.

Askarteena HV ee madaniga ah ee ka socda Buskerud iyo Telemark waxay maalinimadooda ka shaqayaan shaqooyin joogto oo caadi ah, waxaana ka mid ah macalimiin, tuubiistayaal, kumbiyuutarada, kuwa jirka, nijaarro, qareeno, rinjiyeyaal iyo dhakhaatiir. Askartu waa hooyooyin iyo aabayaal, walaalo, oo wakhti buuxa ah, laakiin waxay tababaraan ilaa 30 maalmood sannadkiiba si ay sida ugu fiican u caawiyaan dadweynaha marka loo baahdo.

Waxaad nagala socon kartaa baraha bulshada si aad ula socoto xogta:

Facebook: www.facebook.com/gunnerside

X: @istrygunnerside

Instagram: @innsatsstyrkegunnerside

Nala soo xiriir anaga samaysona balan si aad noogula kulanto goobta, aadna u sameeyso wareysiyo, aadna sawiro ka qaadato si aad u hesho aragti ku saabsan tababarkeena - waxaan hubnaa inay noqon doonto dano guud.

Xiriiriyaha: Mats Conny Øien 9888 5212